WELCOME TO Children's Mercy

Xaquuqda bukaanka iyo balanqaadka aan kuu samaynayno

Children's Mercy
KANSAS CITY

LOVE WILL.

Higsiyada Isbitaalka

Xeerarkaan waxay qabanayaan qof kasta, ayna ku jiraan shaqaalaha, bukaanka, qoysaska iyo martida.

Samee:

- Raac xeerarkeena isbitaalka.
- Ka dhig isbitaalka meel badqab iyo raaxo leh.
- Kula dhaqan qof kasta qadarin iyo sharaf.
- Ilaali sirta iyo xogta dadka kale.
- Xiro dhar aan ciyaal suuq ahayn ama colaad abuurayn qadarina siinaaya dadka kale.
- Ixtiraam kala duwanaanshaha dadka kale, ayna ku jiraan da'da, isirka, galmada/dookha galmada, aqoonsiga jinsiga ama muujinta, isirka, diinta, wadanka qofku u dhashay, naafada jirka ama dhimirka, xaalada dhaqan dhaqaale, aqoonsiga ciidan ama luuqada.

Ha sameyn:

- Cidna ha takoorin, u hanjabin ama ha dhibaatayn.
- Ha adeegsan luuqad aflagaado ama xaasidnimo ku jirto.
- Ha adeegsan xadgudub jireed ama mid dareen.
- Ha keenin ama ha adeegsan hub ama daroogo sharci daro ah xarumaheena ama dhismayaasheena.
- Ha adeegsan tubaako, sigaar koronto ah ama khamri markaad joogto goobaheena ama dhismayaasheena.
- Ha xadin ama burburin hantida isbitaalka ama agabka dadka kale.
- Haku shaqaysan agab caafimaad oo isbitaalku leeyahay. Waa inay qalabkaan adeegsadaan kaliya dadka loo ogol yahay.
- Ha aadin meelaha la xiray.
- Ha ka qaadin sawir, muuqaal ama cod shaqaalaha ayagoon kuu fasixin.

Xaquuqaha Bukaanka

Balanqaadka aan u samayno bukaankeena:

- Muhiim ayaad noo tahay.
- Waxaad qayb ka tahay kooxdaada daryeelka.
- Waxaad si xor ah ula hadli kartaa kooxdaada daryeelka caafimaadka si aad ugala hadasho daryeelkaaga iyo badqabkaaga. Daryeelkaaga iyo badqabkaaga ayaa ah yoolkeena koobaad.
- Waxaad na waydiin kartaa su'aalaha ugu badan ee aad doonayso. Waxaad codsan kartaa turjumaan markaad doonto.
- Waxaad noo sheegi kartaa dareenkaaga. Waan kuu sheegi doonaa runta.
- Waan ku dhagaysan doonaa.
- Waxaan kaala hadli doonaa daryeelkaaga oo lagu bixinaayo luuqad aad fahmayso.
- Waxaan kaa caawin doonaa inaad samayso waxaad u baahan tahay si aad kobac iyo waxbarasho u samayso.
- Waan kuu dhimrin doonaa ilaa intaan awoodno markaan ku daryeelayno.
- Waxaan dabooli doonaa jirkaaga illaa intaan awoodno.
- Waan ku waydiin doonaa haddii aad xanuun dareemayso. Waxaan iskudayi doonaa inaan ku caawino si aad u bogsooto sida ugu dhakhsaha iyo badqabka badan ee suuragalka ah.
- Waxaan kaa caawin doonaa inaad sii wado samaynta waxyaabaha muhiimka kuu ah adigga, qoyskaaga ama diintaada.
- Waxaan kaa caawin doonaa inaad barato sida loo daryeelo naftaada.

Waxaan sidoo kale:

- Kuu sheegi doonaa cidda aan nahay.
- Kuu sharaxi doonaa shaqadeena.
- Waxaan kaala hadli doonaa sababta aad isbitaalka u joogtid.
- Waxaan ku sharaxi doonaa sida xaaladuhu noqon karaan.
- Waxaan u sheegaynaa dhakhtarkaaga inaad isbitaalka taalo.
- Waxaan u sheegaynaa saaxiib ama xubin qoyskaaga ah inaad isbitaalka taalo (18 jir ama kasii wayn, markaad codsato).
- Waxaan xaqiijin doonaa inaad qanacdo sida ugu macquulsan.
- Waxaan kuu sheegaynaa waxa ku caawin kara iyo waxa aan isleenahay way ku caawin karaan.
- Waxaan ku siin doonaa xogta aad u baahan tahay si aad go'aano uga qaadato daryeelkaaga.

Waxaan ku siin doonaa daryeel wanaagsan iyo qadarin ayadoon laga eegayn:

- Aqoonsigaaga jinsi.
- Midabka jirkaaga.
- Meesha aad ku dhalatay.
- Luuqada aad ku hadasho.
- Gunnooyinka aad qaadato.
- Waxa aad samayn karto iyo waxa aadan samayn karin.
- Sida aad u egtahay.
- Qofkee kamid ah qoyskaaga.
- In adigga ama qoyskaagu awoodo dhiibista qarashka daryeelka.

Xaquuqaha Dheeraadka ah:

- Qoyskaaga iyo saaxiibadaada ayaa kula joogi kara marka xeerarka isbitaalku ay sheegaan inay habboon tahay iyo marka aad doonayso inay kula joogaan.
- Haddii aan kuusoo jeedino cilmi baaris daraasad ah, waad diidi kartaa ama yeeli kartaa. Inaad «diido» ma badalayso sida aan kuu daryeelayno.
- Waxaan kaa caawin doonaa samayn qorshayaal haddii aad adigga ama qoyskaagu doorataan inaad aadaan guriga ama isbitaal gaar ah, ilaa inay waxyeelo ku tahay maahee caafimaadkaaga iyo badqabka.
- Adigga iyo waalidkaa ayaa arki kara diiwaankaaga caafimaadka sida sharcigu fasaxaayo. Waxaan kaa caawin doonaa arintaan.
- Adigga iyo waalidiintaada ayaa codsan kara caawimaad ku aadan dhiibista qarashka caafimaadkaaga ama daryeelka caafimaadka.
- Haddii aad jirto 18 ama kasii wayn tahay aadna awoodo inaad go'aano u gaarto si iskaa ah, waxaad abuuri kartaa Dardaaran Hore. Dardaaran Hore
  waa qorshe qoraal ama hadal ah oo noo sheegaaya noocyada daaweynta aad doonayso iyo kuwa aadan doonayn. Waxay sidoo kale noo sheegaysaa cidda ay tahay inay go'aanada kuu gaarto haddii aadan awoodin inaad adigu noo sheegto. Haddii aad doonayso, waxaan kaa caawin karnaa abuurista Dardaaran Hore.
- Haddii aad jirto 18 ama kasii wayn tahay aadna awoodo inaad gaarto go'aanada si iskaa ah, waxa aad xaq u yeelan kartaa inaad aqbasho ama aad yarayso qayb kasta oo ka mid ah daawaynteena caafimaadka. Haddii haddii aad ka yartahay 18 aadna doonayso inaad door ku yeelato qayb kamid ah daryeelkaaga, waxaan kala hadli doonaa arintaan adigga iyo dadka kale ee loo baahdo.
- Haddii aad jirto 18 ama kasii wayn tahay aadana awoodin inaad go'aanada iskaa u gaarto, waxaan la hadli doonaa waalidkaaga sharciga ah ama wakiilka loo xil saaray gaarista go'aannada lagu saleeyay maslaxadaada koobaad.

Masuuliyaadka Ku saaran Ka waalid ahaan

Waxaa jira waxyaabo kaliya adigu aad noo sheegi karto. Si aan daryeel wanaagsan oo badqab leh kuu siino, waxaa muhiim ah inaad noo sheegto:

- Sababta aad isbitaalka u timid.
- Sida xaalkaagu yahay.
- Haddii aad xanuun dareemayso iyo meesha ku xanuunaysa.
- Waxa qolyaha kale sameeyeen si lagaaga caawiyo bogsashada.
- Waxa adigga iyo qoyskaagu aad guriga ku qabataan si lagaaga caawiyo inaad bugsooto.
- Haddii aadan wax fahmin.
- Haddii aad walaacyo ka qabto daryeelkaaga.
- Haddii ay jiraan wax aad niyada kuhayso.
- Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo raacida qorshahaaga daryeelka ama joogtaynta balamahaaga.

Su'aalo ama Walaacyo ma qabtaa?

Haddii aad isleedahay ma aanaan ilaalin balanqaadkeena, fadlan noo sheeg si aan iskugu dayno inaan wax hagaajino. Waxaad sidoo kale codsan kartaa inaad la hadasho qof kasocda Gudigga Hufnaanta marka aad doonto haddii aad dhibaato ku qabto go'aannada daawaynta.

Caawimaada Dhaqaalaha

Cunug kasta oo jiran waxa uu xaq u leeyahay daryeel. La taliyaasha dhaqaalaha ayaa awoodi kara inay ka caawiyaan qoysaska helitaanka lacag ay ku daboolaan qarashka adeegyada caafimaadka. Children's Mercy waxa uu caawimaad dhaqaale siiyaa dadka buuxsha shuruudaha xeerka caawimaada dhaqaalaha. La taliyaasha dhaqaaluhu waxay aad isleedahay dhibaato ayaa kaa haysan doonta dhiibista qaybta kaagasoo aada caymiska, lacagaha lagaa jaranaayo ama cadadyada kale ee aan ku jirin caymiska. La taliye dhaqaale ayaa u baahan doona inaad siiso qaar kamid ah xogta si uu u go'aansho inaad u qalanto iyo inkale caawimaada dhaqaalaha.

Qaar kamid ah shuruudaha ugu muhiimsan ayaa ah:

- Waa qasab inaad dagan tahay gobalka Kansas ama Missouri.
- In dakhliga qoyskaaga (oo loo qaybshay tirada xubnaha qoyska) uu ka yar yahay ama u dhigmo 300% cabirada fakhriga ee federaalku Dajiyay.
- Aad isticmaashay dhammaan ilahaaga barnaamijyada kale (uuna ku jiro Medicaid).

Children's Mercy waxa uu ka qaybgalaa inta badan qorshayaasha caymiska. Fadlan la xariir caymiskaaga
ama shirkada ku siisa daryeelka maaraysan si aad u xaqiijiso kharash daboolista ay sameeyaan kadibna
booqo **choosechildrensmercy.org** si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah.

Wixii xog dheeraad ah oo ku aadan caawimaada dhaqaalaha, fadlan booqo webseetkeena (childrensmercy.org/financialcounseling/). Dhammaan foomamka Caawimaada Dhaqaalaha waxaa laga heli karaa luuqadaha Ingiriiska, Isbaanishka, Carabiga, Soomaaliga, Fiyeetnaamiis, iyo Baarmiis. Si aad u la xariirto taliye dhaqaale: iimeel u dir admfc@cmh.edu ama wac (816) 234-3567.

Xariir Macno Leh

Caawimaad iyo adeegyo bilaash ah ayay heli karaan dadka naafada ah si ay qaab hufan noolasoo xariiraan, sida:

- Turjumaannada dadka dhagaha iyo indhaha la' oo xirfadleh
- Xog qoraal ah oo qaabab kale ah

Waxay siiyaan adeegyada luuqada oo lacag la'aan ah dadka luuqadooda hooyo aysan ahayn Ingiriiska, sida:

- Turjumaannada caafimaadka oo xirfadleh
- Macluumaadka kuqoran luuqado kale

Wixii xog dheeraad ah nagalasoo xariir (816) 234-3474.

Iskastoo aan samaynayno dadaal kasta si aan wax uga qabano walaacaaga, waxaad sidoo kale la xariiri kartaa mid kamid ah ama ka badan wakaaladaha soo socda:

Missouri Department of Health Hospital Licensing and Certification (Waaxda Ruqsada iyo Shahaadada Isbitaalka u qaabilsan Waaxda Caafimaadka ee Missouri)
P. O. Box 570
Jefferson City, MO 65102
Taleefanka: (573) 751-6303
Fakiska: (573) 526-3621

Missouri Board of Healing Arts (Gudigga Farshaxanka Daawayn ee Missouri)
P.O. Box 4
Jefferson City, MO 65102
Taleefanka: (573) 751-0098
Fakiska: (573) 751-3166

Missouri State Board of Nursing
P.O. Box 656
Jefferson City, MO 65102
Taleefanka: (573) 751-0681
Fakiska: (573) 751-0075

Department of Health and Human Services Office of Civil Rights (Xafiiska Xuquuqda Madaniga ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha)
601 East 12th Street,
Room 248
Kansas City, MO 64106
Taleefanka: (816) 426-7277
Fakiska: (816) 426-3686

Ama aad u gudbiso cabasho:
Taleefanka Laynka Adeegga Duqoowda iyo Naafada:
(800) 392-0210

Kansas Department of Health and Environment (Waaxda Caafimaadka iyo Bii'ada ee Kansas)
1000 SW Jackson, Suite 330
Topeka, KS 66612
Taleefanka: (785) 296-1240
Fakiska: (785) 296-1266

Kansas State Board of Healing Arts (Gudigga Farshaxanka Daawayn ee Gobalka Kansas)
235 SW Topeka Blvd.
Topeka, KS 66603
Taleefanka: (785) 296-7413
Fakiska: (785) 296-0852

Kansas State Board of Nursing
900 SW Jackson, Suite 1051
Topeka, KS 66612
Taleefanka: (785) 296-4929
Fakiska: (785) 296-3929

The Joint Commission
One Renaissance Blvd.
Oakbrook Terrace, IL 60181
Taleefanka: (800) 994-6610
Fakiska: (630) 792-5005

Center for Medicare and Medicaid Services (Xarunta Adeegyada Medicare iyo Medicaid)
7500 Security Blvd.
Baltimore, MD 21244
(800) 633-4227
TTY: (877) 486-2048

(Loogu talagalay Bukaannada Medicare)
(855) 408-8557
TTY: (855) 843-4776

U doodaha Bukaanka

U doodayaasha bukaanka ee jooga hildren's Mercy ayaa isku xira bukaannada, qoysaska iyo shaqaalaha isbitaalka. Waxay fududeeyaan xariirka waxayna shaqaalaha door ka siiyaan xalinta ciladaha la xariira qanaacada bukaanka, iyo sidoo kale waxay aqoonsadaan fursadaha hormarinta ururka. U doodaha bukaanka ayaa diyaar u ah inuu ka shaqeeyo walaacyadaada iyo, haddii loo baahdo, inuu kaa caawiyo gudbinta cabashadaada. Guddiga cabashada ayaa dib u eegis ku samayn doona cabasho kasta kadibna ku siin doona jawaab qoraal ah. Jawaabta qoraalka ah waxaa ku jiri doona magaca qofka lagala xariiraayo isbitaalka, talaabooyinka la qaaday si loo baaro cabashada, natiijooyinka hanaanka cabashada iyo taariikhda la dhamaynaayo hanaanka cabashada. Waxaad la xariiri kartaa u doodaha bukaanka ood ka wacayso (816) 234-3119 markaad joogto Missouri ama (913) 696-8872 gobalka Kansas ama iimeelka oo ah patientadvocate@cmh.edu.

Lambarada ugu waawayn ee Children's Mercy

Missouri

Xarunta Children's Mercy ee Adele Hall	(816) 234-3000

Kansas

Xarunta Children's Mercy Hospital ee Kansas	(913) 696-8000
Laynka Xogta Kalkaalinta	(816) 234-3188
ama wicitaanka bilaashka ah	(800) 800-7300

Wixii xog iyo khayraad dheeraad ah, waxaad booqan kartaa webseetkeena oo ah **childrensmercy.org**.

Children's Mercy KANSAS CITY

BEST CHILDREN'S HOSPITALS U.S.News & WORLD REPORT RANKED IN 10 SPECIALTIES 2020-21

Children's Mercy waa shirkad bixisa fursad shaqo oo loo siman yahay/cadaalad ah ahna wakaalad ka tirsan United Way. 2/21

Copyright © 2021 The Children's Mercy Hospital. Dhamaan xuquuqaha daabacaada waa la ilaaliyey. 21-LAS-0556

21-LAS-0556 2/21